## Muddo intee le'eg ayaan caymiska yeelanayaa?

Haddii aad xaq u leedahay Qorsheynta Qoyska oo Kaliya, caymisku wuxuu soconayaa 12 bilood ka-dib ansixintaada iyadoo aan la eegayn isbeddelka dakhliga ku yimid.

## Maxaan sameeyaa marka caymiskeygu uu dhammaado?

Waxaad dib u codsan kartaa caymiska Qorsheynta Qoyska oo Keliya ka-dib marka aad boostada ku hesho ogeysiiska in caymiskaagu uu dhammaanayo.
Haddii uu isbeddel ku yimaado dakhligaaga ama inta uu qoyskaagu le'eg yahay, ayaa waxaad xaq u yeellan kartaa caymiska Apple Health oo bilaash ah ama qiimahiisu jaban yahay.

## Caymiska Apple Health (Medicaid) sidoo kale miyay ku jiraan adeegyada qorsheynta qoyska?

Haa. Apple Health ayaa bixiya caymis baaxad-buuxda oo leh dheefo dheeraad ah. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah, booqo **hca.wa.gov/apple-health**

## Miyaan codsan karaa Apple Health aniga oo haysta caymiska Qorsheynta Qoyska oo Keliya?

Haa, waxaad codsan kartaa caymiska Apple Health oo baaxad-buuxda leh waqti kasta.

## Sideen ku oggaan doonnaa haddii la ii oggolaadey iyo marka uu caymiskeygu bilaabanayo?

Waxaad ka heli doontaa ogeysiisyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) oo laguugu soo diri doonno boostada. Haddii la oggolaado, caymiska wuxuu bilaaban doonnaa maalinta koowaad ee bisha aad codsatay.



**Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?**

Barta Internet-ka: **hca.wa.gov/family-planning**

Emayl-ka: **hcafamilyplanning@hca.wa.gov**

Telefoonka: 1-800-562-3022


Washington State Health Care Authority

Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) wuxuu u hoggaansamaa dhammaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka Washington iyo dowladda federaalka waxaana ka go'an in uu suurtageliyo in si siman loo helo adeegyadeenna. Haddii aad u baahan tahay diyaafadin, ama u baahan tahay dokumeentiyo ku qoran luuqad kale ama qaab kale ah, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

Washington Apple Health

# Caymiska Qorsheynta Qosyka oo Keliya (FPO)

*Sida loo helo adeegyada qorsheynta qoyska.*



HCA 13-0073 SM (3/25) Somali

## Maxay tahay sababta aan u codsanayo Qorsheynta Qoyska oo Keliya (FPO)?

Waa in aad codsataa haddii adiga:

- Aadan caymis ku jirin oo aadna u baahan tahay adeegyada qorsheynta qoyska (daryeelka ka hortagga uurka/habka xakameynta dhalmada), **ama**
- Aad caymis ku jirtid oo aadna tahay dhibbanaha tacaddi qoys ama aad ka yar tahay 18 sano jiro oo aadna raadinayso adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah.

## Waa maxay adeegyada la caymiyay?

- Waxbarashada qorsheynta qoyska iyo la-talinta halis yareynta
- Dhammaan hababka xamakeynta dhalmada ee ay oggolaatay hay'adda FDA: kiniiniyo, jaamo, garangarro, irbado, IUDs, waxyaabaha la geliyo jirka ama lagu tallaalo, xuubka ka hortagga uurka, koobabka uur baajinta, kondhom ama cinjirka galmada iyo sunta disha shahwada (xumbo, kareem, iyo jel), iyo ka hortagga uurka degdegga ah
- Waxbarashada iyo sahayda loogu talagalay qorsheynta qoyska ee dabiiciga ah iyo ka fogaanshaha
- Hababka ka hortagga uurka ee joogtada ah: hab qalliin oo tuubbooyinka lagu xiro ("tuubbooyin xiran"), ma-dhalleys ka dhigidda haweenayda, iyo ma-dhalays-ka-dhigidda ninka (vasectomy)
- Baaritaanka iyo daaweynta cudurrada galmada lagu kala qaado (STI)
- Baaritaanka kaansarka ilmo-galeenka iyo baaritaanka uurka marka ay habboon tahay
- Booqashooyinka xafiiska ee sida tooska ah ula xiriirra dhibaatada qorsheynta qoyska marka caafimaad ahaan loo baahan yahay
- Tallaalada Fayraska Waraabeeyaha (HPV) iyo Cagaarshow B.

## Halkeen ka heli karaa adeegyada?

Waxaad heli kartaa adeegyada qorsheynta qoyska bixiye kasta ee bixiya Apple Health ee xaqa u leh.

Waxyaabaha uurka ka hortagga ee la iska soo iibsado (OTC) sida cinjirka kondhomka, waxyaabaha shahwada dila (jeelka, kareemka iyo xumbada ka hortagga uurka), ka hortagga uurka degdegga ah (kaniiniga "subaxdii xigta"), iyo ka hortagga uurka ee afka laga qaato (kaniiniyada xaameynta dhalmada) ayaa laga heli karaa farmashiyeyaasha iyadoo uusan dhakhtar kuu soo qorin.

## Halkeen ka heli karaa adeeg bixiye bixiya adeegyada Qorsheynta Qoyska?

Waxaad ka heli kartaa liiska bixiyeyaasha adeegga Apple Health bartan internet-ka **https:/fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/** si aad dheefaha ugu codsato telefoonka, ama qof ahaan.

### Miyaan xaq u leeyahay?

Waa in aad ka soo baxdaa xaddadka dakhliga oo aad noqotaa midkood:

- Qof aan caymis haysan oo aan xaqna u lahayn caymiska Apple Health (Medicaid), **ama**
- Qof caymisan oo raadinaya adeegyada qorsheynta qoyska oo qarsoodi ah.

## Sideen u codsan karaa caymiska?

Si aad u codsato caymiska Qorsheynta Qoyska oo Keliya, ka soo degso arjiga bartan **hca.wa.gov/family-planning**.

Arjigaaga ku soo gudbi:

- Fakiska: 1-866-841-2267
- Iimayl-ka: **apple@hca.wa.gov**
- Boostada: HCA MEDS
  PO Box 45531
  Olympia, WA 98504-5531

Waxaad sidoo kale ka codsan karta telefoonka 1-800-562-3022 khadka dheeraadka ah. 12533.

Adeegyo qarsoodi ah ayaa loo heli karaa dhowr-iyo-toban jirrada iyo dhibbanayaasha tacaddiga ka dhex dhaca guriga. Haddii aad u baahan tahay adeegyo qarsoodi ah, la xiriir bixiyahaaga adeegga Apple Health si aad dheefaha ugu codsato telefoonka, ama qof ahaan.

## Xaddadka dakhliga billaha ah ee Qorsheynta Qoyska oo Keliya ee 2025

| Qofka Keligiisa ah | Qoyska ka kooban 2-Qof | Qoyska ka kooban 3-Qof | Qoyska ka kooban 4-Qof |
|---|---|---|---|
| $3,456 | $4,672 | $5,886 | $7,099 |
| **Qoyska ka kooban 5-Qof** | **Qoyska ka kooban 6-Qof** | **Qoyska ka kooban 7-Qof** | **Qoyska ka kooban 8-Qof** |
| $8,316 | $9,529 | $10,743 | $11,959 |

Qaddarada dakhliga ayaa dhaqangal ah 1-da Abriil, 2025 ilaa 31-ka Maarso, 2026.